

PPT iyo waxbarashada baahiyaha gaarka ah ee loogu talagalay dadka waaweyn

Haddii aad xaq u leedahay waxbarashada dugsiga dhexe/hoose ee dadka waaweyn, waxaad sidoo kale xaq u yeelan kartaa qaar kamid ah habka waxbarashada gaarka ah. Waxaa jira laba nooc oo waxbarashada gaarka ah oo kaladuwan oo loogu tala galay dadka waaweyn kuwaas oo kajira hannaanka waxbarashada dugsiyada dhexe iyo kuwa sare ee hoose ee Norway.

Hal nooc oo kamid ah waxbarashada gaarka ah waxaa loogu talagalay dadka aan si ku filan uga faa'iidaysan heerka waxbarashada iyo halka barnaamijka waxbarashada dadka waaweyn aysan la qabsan karin si ay u dabooshaan baahiyahooda waxbarashada.

Nooca kale ee waxbarashada gaarka ah waxay u diyaarsan tahay dadka u baahan in ay sare u qaadaan ama u helaan xirfadaha aasaasiga ah. Caawimaadda noocaan ah waxay ku habboon tahay marka dadku dhammaystirtaan waxbarashada dugsigooda sare walina ay u baahan yihiin kaalmo, ama haddii ay dhaawacmeen ama xanuunsadeen ayna u baahan yihiin in laga caawiyo shaqo maalmeedkooda.

Labadaba dowladda hoose iyo PPT (Adeegga La talinta Maskaxda iyo Waxbarashada) waa in ay ka qaybqaataan qiimaynta nooca waxbarashada gaarka ah ee ku haboon baahiyahaaga, kulana taliyaan. PPT waxay samaynaysaa qiimayn qoto dheer (luuqadda Norway lagu yiraahdo: sakkyndig vurdering) asaga oo ah qaab dukumiinti muujinaaya in aad u baahan tahay waxbarasho gaar ah iyo in kale. Dowladda hoose waa inay qaadataa go'aan gaar ah (luuqadda Norway lagu dhaho: enkeltvedtak) kaasoo ku saabsan in aad xaq u leedahay waxbarashada gaarka ah iyo in kale, iyo waxa waxbarashada gaarka ah ay noqonayso. Mar kasta racfaan ayaad ka qaadan kartaa go'aanka.

Waa maxay PPT?

PPT waa adeeg bulsho kaasoo sameeya qiimayn qoto dheer (luuqadda Norway lagu yiraahdo: sakkyndig vurdering), asaga oo ah qaab dukumiinti kaasoo muujinaya in ardaygu u baahan yahay waxbarasho gaar ah iyo in kale. PPT waxay ka qayb qaadan kartaa wadashaqayn qaybo badan iskugu jirta oo heer maxali ah, tusaale ahaan adeegga caafimaadka ama Adeegga Xannaanada Caruurta Norway (luuqadda Norway lagu yiraahdo: barneverntjenesten), iyo heer qaran, tusaale ahaan adeegga waxbarashada gaarka ah ee qaranka (luuqadda Norway lagu yiraahdo: Statped). PPT waxaa lagu maamulaa qarsoonaanta sirta.

Maxaad ka filan kartaa dowladda hoose?

Dowladda hoose waa in ay

- xaqiijisaa in danahaaga loo ilaaliyo sida ugu fiican
- dhegaysato fikirkaaga kahor inta aysan qaadan go'aan ku khuseeya
- kula hadasho, kuguna samayso qiimaynta lagama maarmaanka ah
- qiimayso inaad u baahan tahay waxbarashada gaarka ah
- codsato in PPT ku siiso qiimeyn qoto dheer haddii aad codsato, ama haddii barnaamijka waxbarashada dadka waaweyn ay tahay fikradda ah in aad u baahan tahay waxbarasho gaar ah
- meelmariso go'aankaaga shakhsiga ee sheegaya in aad u baahan tahay iyo in aadan u baahnayn waxbarashada gaarka ah haddii aad u baahan tahayna, waa maxay qaabka uu noqonayo
- diyaariso manhajka maaddada qofka u gaarka ah (luuqadda Norway loogu yeero: IOP)
- waxbarashada gaarka ah u bixiso sida ku qeexan go'aanka qofka iyo IOP
- diyaariso warbixin qoran oo sannadle ah oo ku saabsan waxbarashada gaarka ah iyo horumarkaaga iyo horusocodkaaga
- xaqiijiso in lagu siiyo hagitaanka ku saabsan qiimeynta ayadoo ay jiraan ama aysan jirin fasalo, kahor inta aysan go'aan qaadan

Maxaan samayn karaa?

Ka faa'iidaystaha waxbarashada dugsiga/dhexe/hoose ee gaarka ah ahaan, waxaad

- dalban kartaa in waxbarashada gaarka ah ee dadka waaweyn uu eeggo in aad u baahantahay waxbarashada gaarka ah iyo in kale
- tabashooyinkaaga kala hadli kartaa PPT iyo dugsiga kahor inta aadan gudbin
- waa in aad ku lugyeelataa aadna bixisaa aqbalaaddaada kahor inta aysan dowladda joose kaa codsan qiimaynta
- waa inaad ku lugyeelato aadna bixisaa ogolaanshahaaga kahor inta aysan dowladda hoose go'aan ku gaarin in aad u baahan tahay in aad hesho waxbarashada gaarka ah
- waa in aad heshaa warbixinta sannadlaha ah ee qoran ee ku saabsan waxbarashada gaarka ah ee aad qaadanayso iyo qiimeynta hormarkaaga iyo horusocodkaaga
- gudbin kartaa racfaan haddii aan lagu siin waxbarashada gaarka ah
- waxaad racfaan ka qaadan kartaa waxa la baranayo, hirgalinta ama ururka waxbarashada gaarka ah
- go'aansan kartaa in lagaa reecaayo qiimaynta fasalka maaddooyinka halka aad ka qaadato waxbarashada gaarka ah

Haddii aad leedahay mas'uul, mas'uulku wuxuu leeyahay xaquuq taada lamid ah.